



**SOMALI NATIONAL  
BUREAU OF STATISTICS**  
Federal Republic of Somalia

# TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA JANAAYO 2023



## Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Janaayo 2023 ayaa gaaray 133.99, marka la barbardhigo 134.68 bishii Diseembar 2022.

Isbedel bileedka, Janaayo 2023, marka la barbar dhigo Diseembar 2022, ayaa hoos u dhacay -0.51 boqolkiiba. Hoos u dhaca billaha ee ugu badan ayaa ka yimid qiimaha **cuntada, Guryaha, Biyaha, Korontada**. qiima dhaca **Cuntada** ee billaha ah ayaa ahaa **(-1.45 boqolkiiba) Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska oo gaaray (1.78 boqolkiiba)**. (Jaantuska2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Janaayo 2023 iyo Janaayo 2023 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 5.57 boqolkiiba, marka la barbardhigo 6.06 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay **Diseembar 2021** iyo **Diseembar 2022**.

### Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Janaayo 2023 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Janaayo 2023	
Tusaha bishan (Janaayo 2023)	133.99
Tusaha bishii hore (Diseembar 2022)	134.68
Tusaha sanadkii hore (Janaayo 2022)	126.92
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	-0.51%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.57%

### Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-daa

sbedelka boqoleyda ee 12bilood

### Tixraca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Janaayo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

### Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Janaayo 2023

Heerka sicir-bararka bisha Janaayo 2023 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Janaayo 2022 iyo Janaayo 2023.

**Dhammaan qeybaha TSB** ayaa hoos u dhacay 5.57 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Janaayo 2021 iyo Janaayo 2023, marka labar bardhigo 6.06 boqolkiiba 12kii bilood, Diseembar 2021 iyo Diseembar 2022.

**Dhammaan qeybaha TSB isbedelka** billaha ah ee Janaayo 2023 ayaa ahayd mid aan dhaqdhaqaaq sameyn - 0.51 boqolkiiba.

### Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Janaayo 2023.


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

**Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay -1.42 boqolkiiba, bishii Janaayo 2023 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya -1.89 boqolkiiba bishii Diseembar 2022. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay 6.72 boqolkiiba bishii Janaayo 2023. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 9.44 boqolkiiba Diseembar 2022.

**Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** ayaa wax dhaqdhaqaaq bille ah sameyn 1.78 bishii Janaayo 2023. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sameeyey sare u kac dhan 5.51 boqolkiiba bishii Janaayo 2022. Marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah 5.04 boqolkiiba ee Diseembar 2022.

### Dhammaan Qeybaha TSB-da & Qeybaha La Xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Janaayo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Janaayo 2023 (Dec 2014 = 100)



### Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 36.52 boqolkiiba bishii Janaayo 2023. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid sigaarka (+50.00 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 8.97 boqolkiiba bishii Janaayo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid hoteelada +14.67 boqolkiiba.
- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 7.29 boqolkiiba, 12 bilood ee la soo dhaafay bishii Janaayo 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha adeega bukaan socodka (+9.92 boqolkiiba).
- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda sare u kacay 6.72 boqolkiiba, 12 bilood ee la soo dhaafay Janaayo 2022 iyo Janaayo 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha cuntada (+6.96 boqolkiiba). Qiima kororka waxaa ka qeyb qaatay Burka Qamadiga/sareenta oo gaaray (50.00 boqolkiiba).
- **Kirada guryaha, koronada** ayaa lagu diwan galiyey sare u kac sannadle ah 5.51 boqolkiiba bishii Janaayo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha korontada, gaaska iyo shidaalka (+14.94 boqolkiiba).
- **Qiimaha Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 2.29 boqolkiiba Janaayo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha daabulista Agabka +8.71 29 boqolkiiba


### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Janaayo 2023 (-)

- Guud haan majirin hoos u dhac la taaban karo bishii Janaayo.

War bixin bileedka bisha **Janaayo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## B. Qeybaha ugu weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB -da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Janaayo 2023 (Dec 2014 = 100)



### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Janaayo 2023 (+)

- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey sare u kaac bille ah oo gaaraya 7.73 boqolkiiba bishii Janaayo 2023. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid tubaakada (+14.29 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 2.08 boqolkiiba Janaayo 2023. Hoos u dhaca waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (--+3.64 boqolkiiba).

### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bisha Janaayo 2023 (-)

- Guud haan majirin hoos u dhac la taaban karo bishii Janaayo

## Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Janaayo 2023 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Janaayo 2022 TSB	Diseembar 2022 TSB	Janaayo 2023 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
<b>Dhamaan Qeybaha Tsb</b>	100.00	126.92	134.68	133.99	-0.51	5.57
Cuntada & Cabitaanada	46.04	133.35	144.36	142.32	-1.42	6.72
Tubaakadda	1.25	90.93	115.22	124.13	7.73	36.52
Dharka & Kabaha	5.03	149.18	148.98	149.71	0.49	0.36
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	117.95	124.46	124.46	0.00	5.51
Agabka Guryaha	2.93	109.53	109.53	109.38	-0.13	-0.13
Caafimaadka	5.00	161.16	172.91	172.91	0.00	7.29
Gaadiidka	3.77	107.26	108.42	109.71	1.20	2.29
Isgaarsiinta	2.80	103.03	103.03	103.03	0.00	0.00
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	101.64	103.85	103.85	0.00	2.17
Tacliinta	4.00	109.11	109.11	109.11	0.00	0.00
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	133.78	145.78	145.78	0.00	8.97
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	108.95	108.31	110.56	2.08	1.48

### Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

### Soosaarida tan xigta


Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Febraayo, 2023 waxaa la baahin doonaa 15 Maajo, 2023. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

War bixin bileedka bisha **Janaayo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

**Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Janaayo 2023 marka loo eego COICOPka**

**DHAMMAAN QEYBAHA TSB-da**

kuwa ka qeybqaata (%) heeraka sicir baraka (COICOP)



Isha xogta: NBS

**Lifaaqa 1aad** wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Janaayo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia